# Golaha Wakiilada JSL.

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 36aad fadhigii 28aad**

**28 /04/2018**

**Quraanka: -**Md. Maxamuud Axmed Obsiiyey

**Gudoonka: -** Md. Axmed-yasin Sh. Cali Ayaanle

**Ajandaha Fadhiga:-**Doodda Mudanayaaasha ee Xeerka Qandaraasyada

**Gudoomiye Axmed-yasin: -** Waxaynu maanta u balan saneyna dooda Xeerka Qandaraasyada Qaranka waxaan xog-haynta Farayaa in ay soo qoraan mudanayaasha dooda ka qayb galaya.

**Md. Maxamed Xuseen X. Ciise: -**shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salamayaa, run ahaantii xeerkani waa xeer aad u balaashan muhiimadeedana leh, hadii aan toos u gudo galo xeerka.

**Qodobka 16aad** farqadaha qodobkani waxay gudidda qan daraasyada ka dhigayaan maamul aan haysan madax banaani buuxda, waxayna u dhigayaan (Semi Antonymous Authority),

**waxaans oo jeedinayaa:-** in loo dhigo sidan:- **Farqada 1aad "xeerkan waxaa lagu aasaasay hay'ad madax-banaan oo loogu yeedhi doono Gudidda Qandaraasyada Qaranka"** sida ku cad qodobadaba Dastuurka Qaranka ee Qodobka 113aad iyo 122aad.

**Qodobka 19aad Xubinimada iyo Magacaabista Guddida.** Qodobkani waxa uu khilaaf sanayahay Qodobka 90aad ee Dastuurka oo madaxweynaha siinaya awooda magacaabista Masuuliyiinta Hay'adaha Qaranka.

**Waxaan soo jeedinayaa Qodobka 19aad**

1. gudidda qandaraasyada Qaranku waxay ka koobnaan doonaan Siddeed Xubnood (8xubnood) oo uu soo magacaabo Madaxweynuhu.
2. Gudoomiyaha iyo kuxigeenka gudidda waxaa soo magacaabaya Madaxweynaha.

**Qodobka 22aad Farqadiisa 1aadxarafkeeda A, B** waxay ka hor imanayaan awooda madaxweynaha ee buuxinta jagooyinka banaanaada ee gudidda iyo sidoo kale kala saraynta iyo qaabdhsimeedka Gudidda

**Sidoo kale Xarafka C**. Waxay xubintani Awood aanu lahayn siinayaa wasiirka Maaliyada oo aan lahayn Xaqa magacaabista Xubnaha Gudidda Qandaraasyada Qaranka, oo uu leeyahay Madaxweynuhu Qodobka 90aad.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

a. Hadii uu jagada gudoomiye nimo uu baneeyo waxaa xilka sii haynaya gudoomiye xigeenka inta uu madaxweynuhu soo magacaabayo gudoomiye cusub.
b. Hadii uu gudoomiye ku xigeenku baneeyo jagada, waa in madaxweynugu ku soo magacaabo mudo 30 cisho gudohood ah.
c. Dhamaan xaaladaha kale ee bixinta jagooyinka banaanaada ee xubnaha kale ee gudidda madaxweynaha ayaa soo magacaabaya mudo 30 cisho gudohood ah xubnahaa cusub ee gudidda Mudo 30 cisho Gudohood ah.
d. Xubintan waa in xeerka laga saaraa Qodobkan waayo waa ku celin nuxurka ku xusan Xarfaha A, B, iyo C.

**Qodobka 23aad** Awoodaha iyo Maamulka Gudidda. Farqada 1aad, 2aad, 3aad, 4aad waxay iska hor imanayaan **Qodobada 24aad iyo 25aad** ee xeerkan
**Waxaan soo jeedinayaa:-** in qodobada 23aad iyo 24aad la isku daro oo ciwaanka qodobkana laga dhigo " **Qaab-dhismeedka Gudidda Qandaraasyada Qaranka"** sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in Meesha xog-haynta laga saaro Meesha maadaama oo uu jiro Agaasime Guud.

Qaab-dhismeedka Gudiddana waxaan u dhigi lahaa sidan:-

B. Gudoomiye
T. Gudoomiye Xigeen
J. Boodhka gudida
X. Agaasime guud iyo kh-waax

boodhka gudida waxa isku ah gudoomiyaha, ku xigeenka, iyo lixda xubnood ee kale

**Qodobka 24aad**. **agaasimaha guud**. wuxuu ka hor imanayaa Qodobka 90aad ee dastuurka oo madaxweynaha awood u siinaya inuu magacaabo agaasimaha guud.

**Waxaan soo jeedinayaaaQodobka 24**

1. agaasimaha guud waxa soo magacabaya madaxweynaha.
2. agaasimuhu wuxuu ahaan donaa xoghayn aan ku tirsanayn gudidda.

**Qodobka 25aad Farqadiisa 1aad** waxay ka hor imanaysaa Awoodda Madaxweynaha eek u xusan Qodobka 90aad ee dastuurka oo awood u siinaya Madaxweynaha inuu magacaabo Masuuliyiinta Hay'adaha Dawlada iyo xilalkooda.

Waxaan soo jeedinayaa:- in farqadan xeerka laga saaro maadaama oo uu madaxweynuhu awood u leeyahay magacaabista gudoomiyaha iyo ku xigeenkiisa gudidda qandaraasyada Qaranka.

**Qodobka 30aad gudida dib u eegista.** Gudidan waxey curyaamin kartaa shaqada Gudidda Qandaraasyada Qaranak madaama oo ay cid kaliya soo magacaabeyso kaas oo ah Wasaarada Maaliyada.

**Waxaan soo jeedinayaa :-**Gudidan muhiim maaha hadiina laga maarmi waayo waxaan u soo xuli lahaa soo xulistooda sidan:-

- maaliyada -xubin.
- gudida maamul wanaaga-xubin.
- garsoorka (gudomiyaha maxkamada sare)-xubin.
- hantidhawrka guud -xubin. Iyo
- daneeyayaasha qandaraasyada ee madaxa banaan-xubin

**Qodobka 35aad:** hay'adaha qandaraas bixinta. Xeerkani wuxuu Qaatay aragtida ah, in hay'adkastaa Farqada 1aad Miisaaniyada Qaranka ku leh qoondayn ay noqoto Hay'ad Qandaraas bixineed, balse xeerkan kuma cada xadka ugu sareeya iyo kan ugu hooseeyaa ee ay hay'adu awooda u yeelan karaan inay qandaraas ku bixiyaan (threshold).

**Waxaan soo jeedinayaa :-**

- Gudidda Qandaraasyada Qaranka oo kaliya ayaa awood u leh bixinta Qandaraasyada Qiime ahaan ka badan $5, 000 (shankun oo doolar) ama shilin qiime ahaan u dhigma.

- Gudiddu waxay awood u leedahay inay la socoto oo qiimayso bixinta qandaraasyada ka hooseeya qiimaha ku xusan Farqada 1aad ee ay bixinayaan hay'adaha Qandaraas bixinta dawladu.

**Qodobka 42aad** Faracyada Qandaraasyada. Qodobkani wuxuu keenayaa shaqada iyo masnaciyadaha Gudiyada Qandaraasyada oo isku noqnoqda iyo waliba kharash dheeraad ag oo uu soo kordhinayo,

**Waxaan soo jeediyanaya:-**

In qodobka xeerka laga saaro maddaama oo ay jiraan gudidda qandaraasbixinta ee hay'adaha dawlada, sida ku cad Qodobka 39aad ee Xeerkan.

**Md. Axmed Barkhad Obsiiye:-**mudanayaasha iyo shir gudoonkaba waan salaamayaa, marka hore waxaad ku raacsanahay intaa uu xildhibaan Maxamed sheegay, qandaraasyada marka la bixinayo si ay shirkadeheenu u awoodaystaan oo ay u tarmaan, waxaan leeyahay wixii malyuun Doolar ka yar waa in la siiyaa shirkadaha guda si ay awoodoodu u kacdo oo la dhiso wixii intaa ka badana waa in shirkadaha caalamka loo ban dhigaa ayaan soo jeedin lahaa waanad mahadsantihiin,

**Gudoomiyaha:-**Way mahadsanyihiin Xildhibaanadu, xeerkani waxaa kale oo uu yahay kuwa ugu muhiimsan ee toosinka iyo ladagaalanka musuqmaasugu ku imanayaan waxyaabaha lagu dabaqo, waana xeer aad iyo aad u mihiim ah, xeerkana waa mid wakhti badan la galiyay gudiduna ay xil weyn iska saartay soo diyaarintiisa.

Mudanayaashuna xaq ayay u leeyihiin in ay wax ka badalaan iyo in wax ku daraan waana awoodahooda dastuuriga ah, waxaan codsanayaa in xeerka si fiican loo soo akhriyo maalinta bari ahna doodiisu inoo sii socon doonto, xeerkana waxaa uu ka mid yahay xeerarka ugu muhiimsan ee la inaga sugayo markaa waa in si wanaagsan loo soo akhriyo, waxaanan idiin sheegayaa in ayna doodiinu noqon doonin biyo col-dhaanshay ee aanu tix galin doono oo wax ka badelkiina iyo wax ku darkiinuba wuu ka muuqan doonaa xeerka waana inoo bari insha allaah fadhiguna wuu xidhanyahay.

# Golaha Wakiilada JSL.

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 36aad fadhigii 27aad**

**29/04/2018**

**Quraanka: -**Md. Xaamud

**Gudoonka: -** Md. Axmed-yasin Sh. Cali Ayaanle

**Ajandaha Fadhiga:-** Maalintii 2aad ee Doodda Mudanayaaasha ee Xeerka Qandaraasyada

**Gudoomiye Axmed-yasin: -** waxaa inoo socotay fadhigii shalay doodda Xeerka Qandaraasyada Qaranka iyadoo dooddu maanta inoo sii soconayso, waxaana ku soo dhowaynayaa doodda Md. Axmed Cabdi Nuur.

**Md. Axmed Cabdi Nuur (kijaandhe) :-** aad iyo aad ayaan ugu mahad celinayaa Gudoomiyaha iyo mudanayasha fursadan isiiyay, run ahaantii xeerka maan wada dhamayn, xeerkana waa xeer aad u habaysan, hase ahaatee waxaad moodaa in ay xeerka tanzania inoo soo naqileen, oo aanu waa qici ahayn, waayo waxaa laga yaabaa in dawladaasi halmilyan ay qandaraasyada ku bixiso, halaka marka aan dalkeena eegto inta uu qandaraaska ku bixiyaa aanu dhamayn boqol kun oo doolar, markaa waxaad moodaa in shaqaalaha iyo waxyaanahaa la daadajiyo ilaa degmooyinka

Sidoo kale xeerku mabdi'iyan wuu fiicanyahay, ee structure kaa badan dawlada ahaan waxay ku keenayaan kharashbadan oo aanay la qaadi karayn, inaga oo ka warhayna kharashka dawlada, xeerkan meelo badan ayaan ka qaadan karnaa lakiin waxaan leeyahay xeerkani waxa uu u baahan yahay in aad looga shaqeeyo oo meelaha uu leeyahay ha la daadajiyo qaab dhismeedka awoodeeda ma hayno sidoo kale dhaqaale looma hayo.

Mida labaad ee aan ka hadlayaa waxaa weeyi meel ayaynu is dhaafinay, qan daraasyada muwaadiniinta ah wax ha loo xidho ayaynu nidhi, markaa waxaan odhan lahaa in wixii ka yar 5milyan oo doolar ayaan loogu iman ayaan soo jeedinlahaa.

**Md. Cumar Axmed Saleebaan (sanweyne):-** Gudoomiyewaxaa weeyaan dawladeenu waxa ay ku dhisantahay waa hab madaxweyne (presidential System) oo awooduhu inta badan waxay gacanta ugu jirtaa waa madaxweynaha, madaamo oo ay sidaa tahay waxa aan ka hadlaynaana ay tahay gudiddi madaxbanaan, markaa sida hay'adaha kalaba ay u dhisan yihin waa in iyadana sharcigeeda

loo raacaa, madaamo oo ay tahay gudi qaran waxaa xaq u leh in uu madaxweynuhu uu soo magacaabo, wasiir ma magacaabi karo, kuxigeena ma soo magacaabi karo wax shaqo oo ay ku leeyihiin ma jirto waayo wasiirku waa kii la baadhi lahaa.

Markaa anigu waxaan soo jeedinayaa Gudoomiye in sida gudiyada kaleba loo magacaabo loo magacaabo gudiddaa Qandaraasyada oo uu magacaabo madaxweynuhu, waana in aan kala ilaalinaa qaybsanka awoodaha waanad mahadsantihiin.

**Md. Cabdilaahi Xuseen Cige (Balaakey): -** shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salaamayaa, xeerkani waxaa uu soomaray golaha 2016 waana la celiyay celiyay, waxaanad moodaa in qodobadii hore ee uu goluhu ku diiday ay ku jiraan, xeerkana waa xeer aad u balaadhan muhiimna u ha Qaranka, meelo halbawle dalkan u ahina ay u baahantahay.

Waxaan soo jeedin lahaa in qodobo badan oo xeerkan ku jira sidooda looga saaro, maadaama oo uu golahani hore u diiday, sida Qodobada Magacaabista oo kale iyo qodobada sheegaya Gudidda Dib u eegista waa in labadaaba laga saaraa, loona daayo awooda madaxweynaha.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa xeerkan waxaa ku qoran Agaasimaha waxaa magacaabaya komishanka waxaanu ka soo hor jeedaa Dastuurka Qaranka oo agaasime guud waxaa magacaaba Madaxweynaha, qodobo badan oo kale xeerkana ku jiraa way jiraan xeerkana waa xeer qarankani u baahanyahay oo aad u muhiim ah oo hadii uu si fudud inagu maro hadhaw dhibooto ka tomaad waa mushkilad, markaa ayaynaan eegin Hay'adaha inoo soo sameeyay ee waa in aan ka eegnaa danta Qarankani leeyahay. Waxaanan qabaa in gudi loo saaro gudiddaa oo mudo sadax cisho ah ku soo diyaarisa waanan ka baxay.

**Gudoomiyaha:-**Xildhibaan Naasir, waad ka warbixisay xeerka mudanayaashu xaq ayay u leeyihiin in ay araa dooda ka dhiibtaan xeera "Eray kaagama Banaana ee waad mahadsantahay ".

Mudanayaal waad ku mahadsantihin sida aad ugu qayb qaadateen, waxaad moodaa in xeerkani mihiimada uu leeyahay iyo sida aad uga qayb qaadateen ayna is lahayn,hadana idinkuma khasbi karno hadii aydaan u soo diyaar garoobin in aad ka doodaan, run ahaantii Qodob ka hor imanaya dadkii ku soo doortay ama adiga laftaada kaa hor iman doona oo aad fursad u haysato in aad wax ka qabato in aad dayacdaa ma wanaagsana.

Doodu waxay inoo socotay ilaa shalay, mana sii socon karto intaa in ka badan, doodii xeerkuna way dhamaatay bari iyo sahandanbe waa la isku soo guri doonaa, sabtidana waa loo codayn doonaa fadhiguna wuu xidhan yahay axadana waxaa inoo bilaabmi doonata dooda Xeerka maaraynta qashinka

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyada**

**Cabdirisaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**